

Tiiraanyadda iyo ficil celinta tiiraanyadda ee carruurta iyo dadka da' yarta ah

Tiiraanyadda waa ficil celin dabiici ah ee timaada marka qof nagu soo-dhow uu dhinto. Dhowr wado, waxay ficil celinta tiiraanyadda carruurta la mid yihiin ficil celinta ay bixiyaan dadka qaangaarka ah, oo ay ka mid yihiin dareenka khasaaro dhimasho, hiloow iyo baroorasho, laakin waxay sidoo kale kaga duwan yihiin dhawr wado kale. Kuwa kale waxaa ka mid ah, ficil celinta cunuga waxay ku xirnaanaysaa da'diisa iyo marxaladda koritaankiisa. Carruurta jirta da'da dugsigu ka hor waxay tusaale ahaan leeyihiin fahan adag oo heer-sare ah marka loo eego maxa ay dhimashada la tahay carruur jirta da'da dugsigu.

Inkastoo ficil celinta ay kala duwanaanayso, ficil celintooda dhow, gaar ahaan ka gadaal dhimasho kadis ah, waxaa badanaa ka mid noqonaya:

- Arga-gax, dareen dhalanteed, diidis
- Wax aadan ku niyad fiicnayn iyo jah-wareer
- Mudaaharaad, caro
- Is-beddal deg-deg ah ee u dhexeeya baroorashada, murugo iyo dib-u-bilaabista hawl-qabadyadda caadiga ah

Ka gadaal marxalad dareen kulul leh, iyo marka cawaaqibka khasaarahooda dhimasho uu si tartiib-tartiib ah ay hoos ugu dhacdo, arga-gaxooda iyo dareenkooda dhalanteedka wuu yaraanayaa, iyo ficil celinta kale waxay noqonaysaa mid aad waadix u ah, tusaale ahaan:

- Xaalad laga walaaco, cabsi ah in laga guuro
- Dhibaatooyin hurdo
- Xanaaq
- Xanuun jirka ah
- Dayacanaan korortay
- Dareen khasaaro dhimasho, hiloow iyo murugaysanaan
- Is-eedayn, gabood-fal
- Dhaqan feejignaan raadin ah
- Dhibaatooyin isku-urursan iyo qalalaaso korortay

Carruurta soo marta dhacdo dhimasho kadis, rabsho ah waxay sidoo kale u halgamayaan si khayaali ah iyo ka fakarida sida ay u dhacday dhimashadda (tiiraanyo jaah-wareer). Tani waxay adkayn kartaa nidaam tiiraanyo caadi ah waxayna u baahanaysaa gargaar qof xirfad leh illaa ay ficil celinta ay in muddo ah hoos udhac ku yimaado.

Maxay u baahan yihiin carruurta iyo dadka da'yar ee tiiraanyoonaya?

Taageero wanaagsan ee laga helo dadka qaangaarka ah iyo saaxiibada fiican waa muhiim inta lagu guda jiro hanaanka tiiraanyadda. Carruurta iyo dadka da'yar ee tiiraanyoonaya waxay u baahan yihiin:

- Qaab-dhismeed degan oona bad-baadsan(oo ay ka mid yihiin si xiriir ah u sii wadashadda noolal maalmeedka)
- Wada-hadal furan (oo ay ka mid yihiin warbixin gaar ah oo ku saabsan waxa dhacay)
- Caawimaad ah ka dhigida khasaarahooda dhimasho mid dhab ah (Haddii ay macquul tahay u ogolaaw in ay arkaan qofka dhintay, ka qaybqaadashada aaska qofka dhintay)
- Caawimaad ka gayso si ay ula qabsadaan khasaaraha (tusaale ahaan caawimaad ka gayso si aad u hagaajisid dareenka, in aad beddashid fakarka aan habboonayn iyo in muddo ah ka hadal waxa dhacay)